



# Natijoooyinka 2019-20 ee Sahanka Dugsiyada Guulaysta

Bulshada Qaaliga ah ee PPS,

Juun 2019 kii, Guddiga Waxbarashadda PPS waxa ay qaateen [PPS reImagined](#), aragtida qeexan ee degmadeena ee cusub ee ku saabsan nidaamka dugsigeena, barayaasha iyo qalin-jabiyeyaasha. PPS reImagined, bulshadeenu waxa ay bixisaa amar dhiirran oo aad u cad: Dugsiyada Dadweynaha ee Portland waa in ay “u diyaariyaan ardayda in ay hogaamiyaan isbeddelka iyo horumarka adduunka.”

Maanta, xilli uu jiro safmar iyo mudaaharaadyo ka dhacay Portland iyo guud ahaan dalka oo dhan, waxaa naga go'an si ka badan sidii hore sidii aan u rumayn lahayn ballantayadii Aragtidayada, iyo in loo beddelo PPS degmada ay ardaydayadu ay u qalanto.

Tani waa run gaar ahaan marka ay tahay dhismaha nidaam dugsi kaas oo u abuura ardayda fursado ay ku dareemaan dareen lahaansho taas oo uu codkoodu runtii uu u dhisayo isbeddel, nafahadooda iyo bulshadooda. Taasi waa sababta, dib ugu noqoshadii sanad-dugsiyeedka 2018-19, PPS ay u bilawday hirgalinta **Sahanka Dugsiyada Guulaysta**, oo ay martigelinayso Waxbarashada Panorama, in la bilaabo ururinta fahamka tooska ah ee ardayda, qoyska iyo shaqaalaha ay ka qabaan jawiga dugsiyada iyo fasalada.

Waxa aanu bilawnay sahanka saddex fasal 2018-19 waxana aanu ku darnay fasalo sanadkan. Si aad xog dheeraad ah uga ogaato natijoooyinkii u dambeeyey, booqo [daashboodhka natijoooyinka PPS](#).

Sahankayagii 2019-2020 waxa ay dhacay Jeenawari ka hor Covid-19. In kasta oo xogtii la ururiyey ay muhiim tahay, waxa aanu hada kuula soo xidhiidhnay si aad si wanaagsan ugu fahanto sida aanu u taageeri karno baahiyaha ardaydayada ku jira duruufaha cusub. **Ardayda ku jira fasalka 3 illaa 11 ayaa maanta naga heli doona casuumaad si ay u qaataan sahanka Barashada Shucuureed Bulsheed (SEL), Caafimaad-qabka iyo Barashada Onlaynka ah.** Fadlan qaado dhawr daqiiqo si aad uga caawiso ardaygaaga in uu ka jawaabo dhawr su'aalood oo muhiim ah taas oo naga caawin doonta in aanu si wanaagsan ugu adeegno ardaydayada iyo bulshadayada.

Gabagabadii, waxaan ognahay in khibrada ardayga ee gudaha dhismayaashayadu ay ku kala duwan yihiin isirka, waxana aanu dooneynaa in aan ku celino ujeedkayaga ah in aan ka dhigno sinnaanta jinsiyadeed iyo caddaaladda bulsheed safka hore ee shaqadan . Waxa aanu u adeegsan doonnaa aaladdan si aan kor ugu qaadno codadka ardayda ah Mareykanka Dhaladka ah iyo Madowga si aan u dhisno nidaam waafaqsan Aragtidayada Shaqada:

“Haddii, aynu ku soo darno istiraatiijiyadaha Sinnaanta Jinsiyeed iyo Cadaaladda Bulsheed shaqadeena aasaasiga ah ee waxbarashada ardaydeena, macalimiinteena, iyo qaybaha aynu ka koobanahay, oo aanu dhisno awoodayada iyo dhaqankayaga urur ahaaneed si aanu u abuurno sees xooggan si aanu u taageerno arday walba ...

Markaa, waxa aanu dib u sawiran doonnaa Dugsiyada Dadwaynaha ee Portland si aan u hubinno arday kasta, gaar ahaan ardayda Madow iyo kuwa ah Mareykanka Dhaladka ah, in ay xaqiiqsadaan aragtida Sawirka Qalin-jabiyeyaasha.”

Waad ku mahadsan tahay mar labaad ka qaybqaadashada Sahanka Dugsiyada Guulaysta.  
Jawaab-celintaadu waa qayb muhiim ah oo ka mid ah qorshahayaga horumarineed ee joogtada ah.